



15ka-Maajo, 2020

Qoysaska Sharafta leh ee Dugsiyada Magaalada Columbus, Dugsiyada Magaalada Columbus waxay dejiiyen qorshe loogu oggolaanayo qoysaska iyo ardayda inay si bad-qab leh uga soo qaataan alaabtoodii ay kaga soo tageen dugsiyada wixii ka dambeeyay 13kii-Maarso kadib markii gobolku amar ku bixiyay in la xiro dhammaan dhismayaasha dugsiyada laga bilaabo Pre-K ilaa fasalada 12aad.

Hawshaas ayaa bilaaban doonta Talaadada, 26ka-Maajo, ilaa Jimcaha, 29ka-Maajo.

Waxaa noogu muhiimsan bad-qab-kaaga iyo caafimaadkaaga. **Ardyada iyo waalidiinta looma ogolaanayo inay galaan dhismayaasha.** Iyada oo la raacayo tilmaamaha dhaqaatiirta caafimaadka dadweynaha iyo Agaasimayaasha Adeegyada Caafimaadka ee CCS, waxaan qaadnay taxaddarro badan si aan ugu oggolaanno qoysaska iyo ardayda inay kasoo qaataan dugsiyada wixii alaab ah oo ay kaga soo tageen sanduuqyada, miisaska iyo lookarrada ay ardaydu gashato alaabta .

Si loo yareeyo is dhex galka dadka, dhammaan dugsiyada ayaa kuguu keeni doona meesha lagu dajiyo-laga qaado ilmaha ee dhismaha dugsiga hortiisa ee loogu talagalay qoysaska iyo ardayda inay kasoo qaataan alaabtooda. Alaabta waa la soo da-dayaa waxaana lagu soo dhajinayaa magaca adrayga waxaana laguugu keenayaa gaarigaaga adoo ku jira joogana meesha lagu dajiyo-laga qaado ilmaha ee dhismaha dugsiga hortiisa. Ardayda iyo qoysaska waxaa lagu dhiirigelinayaa inay xirtaan fool-saab (maaskaro) marka ay soo qaadanayaan alaabada.

Ardaydu sidoo kale waxay ku soo celin karaan dugsiga hantida uu lahaa inta lagu jiro waqtigan, oo ay kujiraan buugaagta, aaladaha, yunifoomka dugsiga, iyo agabyada kale ee dugsiga loo adeegsado sanadka gudihiis. Qoysaska loogama baahna inay soo celiyaan Kombuyuutarada loo yaqaan 'Chromebooks-yada' ama aaladda Wife-ga guur-guurta ee hotspot-ka (hotspot devices) ee ah deyntra ilaa bilowga sannad dugsiyeedka 2020-2021.

Maamulaha dugsiga ardaygaaga ayaa kula soo xiriiri doona wixii faah faahin gaar ah oo ku saabsan hawshan, oo ay ku jiraan jadwalka soo qaadashada alaabta iyo geeynta. Fadlan raac jadwalka dugsiga oo soo qaado alaabta adoo ku dhaqmaya tabaha bad-qabka kala fogaanshaha bulshada. Ka dib markaad ka soo qaadatid waxyaabaha ilmahaagu leeyahay dugsiga , waxaan kaa codsaneynaa inaad ka baxdo banaanka dhismaha (xaramka). Shaqaalahaa Bad-qabka iyo Amniga ee degmadu waxay diyar u yihiin inay bixiyaan taageero dheeraad ah inta lagu jiro todobaadka.

Waxaan kaaga mahad-celineynaa iskaashiga waxbarashada cunuggaaga iyo samirkaaga madaama aan sii wadno raadinta cudurkaan aan horay loo arag ee COVID-19.

Si daacad ah,

A handwritten signature in black ink, appearing to read "Talisa R. Dixon".

Dr. Talisa Dixon
Kormeeraha Guud / Maamulaha, Dugsiyada Magaalada Columbus
Superintendent/CEO, Columbus City Schools